**DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD**

**ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة**

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 20AAD | CADADKA 9AAD | TAARIIKH: 12/15/20 | Lam. 04 |
|---|---|---|---|

**FAAFINTA RASMIGA AH**

**OFFICIAL GAZETTE**

الجريدة الرسمية

# SHARCIGA ILAALINTA AFKA SOOMAALIGA

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Ilaalinta Afka Soomaaliga** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

**Sharci Lr. 4 ee December 15, 2020, kuna saabsan Sharciga Ilaalinta Afka Soomaaliga.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80$^{aad}$ farqadiisa 16$^{-aad}$ iyo Qodobka 8-$^{aad}$.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/123/2020, kuna taariikhaysan December 9, 2020.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada Xeerkani u leeyahay Badbaadinta iyo Horumarinta Afka Soomaaliga.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1$^{aad}$**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen **Xeerka Ilaalinta Afka Soomaaliga.**

**Qodobka 2$^{aad}$**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3$^{aad}$**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

ولاية بونتلاند الصومالية مكتب الرئيس
Office of the President Puntland State of Somalia

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

**Tix:-XGGW/DPL/123/2020** **Garoowe, Arbaca,** **Taariikh:- 09/12/2020**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **<u>Ansixinta Xeerka Ilaalinta Afka Soomaaliga</u>**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka **64**-aad.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta K/S Madaxweynaha ahna Madaxweyne ku-xigeenka DPL XMWK/DPS/181/ 2020 ee November, 02, 2020 kuna saabsanaa Ansixinta Xeerka Ilaalinta Afka Soomaaliga.

**MARKUU TIX-GELIYEY** Baahida loo qabo Ilaalinta iyo Noolaynta Sooyaalka Afka Soomaaliga.

**MARKUU DHEGEYSTEY:-** Dooddii iyo go'aankiii Golaha Wakiilladu ku Ansixiyey kalfadhiga 47-aad Fadhigiisii 13-aad ee 14/11/2020 Xeerka Ilaalinta Afka Soomaaliga oo ay goob joog ahaayeen **37** Mudane oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiillada.

**MARKUU ARKAY:-** Go'aankii Golaha Wakiilladu ay cod aqlabiyad ah (**34**) Mudane oo gacan taag ah ku ansixiyeen Xeerka Ilaalinta Afka Soomaaliga , halka uu diidey (**1**) Mudane, kana aamuseen (**3**) mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Ilaalinta Afka Soomaaliga.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

**GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND**

---

# XEERKA ILAALINTA AFKA SOOMAALIGA

---

**GAROOWE, NOFEEMBAR, 2020**

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**TUSMO** **BOGGA**


Qodobka 1-aad .......... 2
Erey-bixin .......... 2
Qodobka 2-aad .......... 3
Magaca Xeerka .......... 3
Qodobka 3-aad .......... 3
Ujeeddooyinka Xeerka .......... 3
Qodobka 4-aad .......... 3
Baaxada Xeerka .......... 3
Qodobka 5-aad .......... 3
Ilaalinta Afka Soomaaliga .......... 3
Qodobka 6-aad .......... 3
Waajibaadka Dowladda Ee Daryeelka Iyo Horumarinta Afka .......... 3
Qodobka 7-aad .......... 4
Adeegsiga Af-soomaaliga .......... 4
Qodobka 8-aad .......... 5
Xeerarka Dalka .......... 5
Qodobka 9-aad .......... 5
Heshiisyada Dowladdu Gasho .......... 5
Qodobka 10-aad .......... 5
Shaqooyinka aan looga maarmi karin Afka Soomaaliga .......... 5
Qodobka 11-aad .......... 6
Waxbarashada .......... 6
Qodobka 12-aad .......... 6
Qoraallada Hay'adaha Samafalka .......... 6
Qodobka 13-aad .......... 7
Magac-Bixinta .......... 7
Qodobka 14-aad .......... 7
Ganaaxyada .......... 7
Qodobka 15-aad .......... 7
Soo saarista xeernidaamiyayaal .......... 7
Qodobka 16-aad .......... 7
Burin .......... 7
Qodobka 17-aad .......... 7
Dhaqangalka xeerka .......... 7




GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

# Qodobka 1-aad
## Erey-bixin

Ereyadan haddii aan si kale xeerkani u macneyn, waxaa loola jeedaa sida soo socota:

**"Xeer"** *Waxaa* loola jeedaa Xeerka Ilaalinta Afka soomaaliga.

**"Afka hooyo"** Waxaa loola jeedaa Af-soomaaliga.

**"Dowlad"** Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed sida ku cad Dastuurka Puntland Qodobkiisa 1aad, faqradda 1aad.

**"Dastuur"** Waxaa loola jeedaa Dastuurka DPL ee Soomaaliyeed.

**"Wasaaradda"** Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Puntlad.

**"Shilin Soomaali"** Waxaa loola jeedaa lacagta rasmiga ah ee dalkeena.

**"Dhulka"** Waxaa loola jeedaa Dhulka Puntland sida ku cad qodobka 7-aad ee Dastuurka DPL.

**"Shisheeye"** Waxaa loola jeedaa qof kasta oo aan ahayn Muwaadin Soomaaliyeed.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Ilaalinta Afka Soomaaliga.

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka xeerka waa sidan soo socota:-

1. Badbaadinta iyo horumarinta Afka hooyo, taasoo ah furaha aqoonta, horumarka iyo ilbaxnimada.
2. Dhiirrigelinta iyo gacan-siinta dedaallada dhinacyada ku hawllan badbaadinta iyo horumarinta Afka Soomaaliga.
3. Noolaynta, kaydinta Sooyaalka iyo Suugaanta Afka Soomaaliga.
4. Xoojinta Af-Soomaaliga loona adeegsado waxbarashada asaasiga ah.
5. In lagu abuuro cilmi-baaris ku aaddan Afka Soomaaliga iyo Suugaantiisa.

## Qodobka 4-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerka waxaa lagu dhaqayaa dhulka Puntland oo dhan.

## Qodobka 5-aad
## Ilaalinta Afka Soomaaliga

Dhammaan hay'adaha dawliga ah, kuwa aan dawliga ahayn, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo bulshada qaybaheeda kala duwan, waxaa waajib ku ah in ay si buuxda u ilaaliyaan tayada iyo adeegsiga habboon ee Af-Soomaaliga.

## Qodobka 6-aad
## Waajibaadka Dowladda Ee Daryeelka iyo Horumarinta Afka

Si loo daryeelo loona horumariyo Af-Soomaaliga, dowladdu waxaa ay gudanaysaa waajibaadkan soo socda:

b. Ilaalinta iyo dhaqan-galinta xeerkan.

t. Qoondaynta Miisaaniyad ku habboon daryeelka, Cilmi-baarista iyo horumarinta Afka iyo dhaqanka Soomaaliyeed.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

J. Noolaynta, weyneynta, xusaska iyo munaasabadaha loo asteeyey afka hooyo.

X. Agaasimidda, qabashada dood-cilmiyeed, daraasado iyo tartamo lagu horumarinayo Afka Soomaaliga iyo Suugaantiisa, iyadoo la adeegsanayo war baahinta dawladda.

kh. Dib-u-nooleynta akaadeemiyada Afka Soomaaliga iyo Suugaanta Puntland.

d. Dhiirrigelinta iyo taageeridda dadaallada, hay'adaha iyo shaqsiyaadka ku hawllan daryeelka iyo horumarinta Afka.

## Qodobka 7-aad
## Adeegsiga Af-Soomaaliga

1. Afka Soomaaliga ayaa ah Afka rasmiga ah ee Dowladda Puntland sida ku cad Dastuurka Dowadda Puntland qodobka 8-aad.
2. Dhammaan qoraallada rasmiga ah ee hay'adaha dowladda waxa ay ku soo baxayaan Af-Soomaali, waa la oggol yahay adeegsiga afafka qalaad marka ay lagama maarmaan noqoto.
3. Waxaa waajib ah in Af-Soomaali loo adeegsado: -

B. Waxbarashada asaasiga ah.

T. Warbaahinta dowladda qaybaheeda kala duwan.

j. Tilmaamayaasha (Boorarka) xafiisyada hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn ee dalka ka furan, meheradaha ganacsiga, tilmaamaha iyo farriimaha loogu talo galay dadweynaha I.W.M.

X. Xayeysiisyada lagu dhajiyo fagaarayaasha dadweynaha.

Kh. Shahaadooyinka waxbarashada.

D. Haddii laga maarmi waayo afqalaad in la raaciyo Af-Soomaaliga, waa in Af-Soomaaligu ahaadaa kan horreeya ama sarreeya marka laba af iyo ka badan isku meel lagu wada qorayo.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 8-aad
## Xeerarka Dalka

Dhammaan xeerarka dalka lagaga shaqeeyo iyo awaamiirta Dawladda ka soo baxda, waxaa lagu soo saarayaa Af-Soomaali, afaf kalena waa loo rogi/turjumi karaa marka loo baahdo.

## Qodobka 9-aad
## Heshiisyada Dawladdu Gasho

1. Heshiis kasta oo dowladdu la gasho dhinac kale oo Soomaaliyeed, nuqulkiisa asalka ah waa in lagu qoraa Af-Soomaali si loo fududeeyo fahamka heshiiska.
2. Waa la oggol yahay heshiis ku qoran af qalaad, haddii cidda dowladdu heshiiska la galeyso ay tahay shisheeye. Waxase waajib ah in heshiiskaas laga sameeyo nuqul lagu turjumay Af-soomaali.

## Qodobka 10-aad
## Shaqooyinka Aan Looga Maarmi Karin Afka Soomaaliga

1. Qof kasta oo loo qaadanayo shaqooyinka aan looga maarmin Af-Soomaali, waxaa uu soo marayaa imtixaan lagu hubiyo heerka aqoonta Af-Soomaaliga xagga akhriska, qorista iyo ku hadalka, Waxaa shaqooyinkaas ka mid ah: -
   B. Turjumaannimada.
   T. War-tebinta Af-Soomaaliga ku baxda.
   J. Gurmadka deg-degga ah (ambalaaska iyo dab-demiska).
   X. Xafiisyada xog-bixinta iyo kuwa xiriirka dadweynaha ee xarumaha bixiya adeegyada muhiimka ah sida biyaha, korontada, isgaarsiinta, caafimaadka iyo kuwa la midka ah.
   Kh. Shaqaalaha xafiisyada nootaayoleyda.
2. Diyaarinta iyo qaadista imtixaanka waxaa yeelanaya guddi ka kooban Wasaaradaha Warfaafinta iyo Waxbarashada, marka laga reebo warfidiyeenka oo imtixaannada looga baahdo uu qaadayo guddiga sare ee warbaahinta Puntland sida uu qabo xeerka Warbaahinta Puntland qodobka 5-aad.

3. Dadka ay shaqaaleynayaan hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn waa in imtixaankooda ay qayb ka noqoto qorista, akhrinta iyo ku hadalka Afka Soomaaliga.

## Qodobka 11-aad
## Waxbarashada

1. Af-Soomaaligu waa afka rasmiga ah ee waxbarashada dugsiyada, marka laga reebo maaddooyin ay lagama maarmaan noqoto in lagu dhigo afaf kale.
2. Maaddooyinka lagu dhigayo af qalaad waxaa go'aan ka gaaraya Wasaaradda Waxbarashada & Tacliinta Sare iyo Guddiga Tacliinta Sare.
3. Si kor loogu qaado heerka aqoonta afka ee ardayga dhigta waxbarashada sare, waa inay jaamacaduhu manhajkooda ku daraan maaddada daraasaadka Af-Soomaaliga iyo suugaantiisa.
4. Wasaaradaha waxbarashada, warfaafinta iyo jaamacaduhuba waxaa ay ka wada shaqeynayaan asteynta iyo jaangoynta manhajka jaamacadaha ee daraasaadka Af-Soomaaliga.
5. Ardayda ka qallin jabisa waxbarashada sare (Jaamacadaha) waxay buugtooda qalin jebinta ku diyaarinayaan Af-Soomaali iyo luqadaha kale ee ay wax ku baranayaan.

## Qodobka 12-aad
## Qoraallada Hay'adaha Samafalka

1. Dhammaan qoraallada muhiimka ah ee ay ku shaqeeyaan hay'adaha samafalka, kuwa dalka iyo kuwa shisheeye waxaa laga sameynayaa nuqul ku qoran Af-Soomaali.
2. Hay'adaha shisheeye ee ka shaqeeya arrimaha samafalka iyo horumarinta waxaa ay adeegsanayaan turjumaan sharraxa ujeeddooyinkooda marka ay la hadlayaan bulshada. Sidaa oo kale farriimahooda iyo barnaamijyadooda wacyigalinta dadweynaha waxaa lagu qorayaa laguna tebinyaa Af-soomaali.



GARYAQAANKA GUUD ... PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 13-aad
## Magac-Bixinta

1. Goobaha danta guud sida waddooyinka, xaafadaha, xarumaha dadweynaha, fagaarayaasha iyo kuwa la midka ah magacyadoodu waxaa ay noqonayaan Af-Soomaali.
2. Dhammaan qoraallada, tilmaamaha (boorarka) goobaha ganacsiga waxay noqonayaan Farta Soomaaliga.

## Qodobka 14-aad
## Ganaaxyada

Ciddii ay ku caddaato jebinta ama ku xad gudubta qayb ka mid ah ama gebi ahaan xeerkan, waxa ay mutaysanaysaa ganaax lacageed oo u dhigma heerka xadgudubka uu gaystay una dhexeeya Saddex Malyan So. Sh. (3,000,000) ilaa Shan iyo toban Malyan (15,000,000) ama doollar u dhigma.

## Qodobka 15-aad
## Soo saarista Xeernidaamiyayaal

Wasaaraddu waxay soo saaraysaa xeernidaamiyayaal lagu hirgelinayo xeerkan.

## Qodobka 16-aad
## Burin

Waxaa la buriyey wixii xeerar ah ee ka hor imanaya ama aan la socon karin xeerkan.

## Qodobka 17-aad
## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR